Isbaarada Alaskan Way

BADAL

HORMAR

Julaay 2018

Dhismaha wadada State Route 99 ee Gobolka ee cusub oo ee Seattle sii dhax maraysa

Jidka Alaskan Way Viaduct, qeybta dalcada ah State Route 99 ee Seattle gudaheeda ah, waxaa la dhisay 1950s, taas oo didilaac iyo jajab yeelatay tobonaankaa sano. Da'da buundada iyo u nuglaashaheeda dhul gariirada, in la badalaa muhiim ayaa u tahay badbaadada bulshada.

Barnaamijka Badelka Jidka Alaskan Way Viaduct waxay badeleysaa sida dadka ugu isticmaalaan jidka SR 99 Seattle. Calaamada cusub, ayaa bixin doonta jid toosan oo sii dhex maraa downtown seattle. Jiirooyinka u dhow garoonka ee dhammaadka wadada tunelka koonfur waxay kugu xireysaa SODO iyo suuqa hoose. Dariiqa yar ee waqooyiga wuxuu xidhiidhin donaa South Lake Union iyo Seattle Center, halka local street John, Thomas iyo Harrison dib la isugu xidhiidhi doono iyo sakadaha Aurora Avenue North dib loo dayac tiri doono si loo hormariyo daqdaqaaqa jaarka.

Kadib markii biriishka dhuleedka la furo, isbaarooyinka waa la dumin doonaa Magalaada Seattle waxay dhisi doontaa jidka biyaha garab maraya Alaskan Way taas oo kor u qaadaysa isu socodka biriishka dhuleedka qaybta koonfureed iyo suuqa hoose.

Barnaamijka eegida

- In Isbaarada Alaskan Way meesha laga saara waxay wado u xaadhaysaa in goob bulsho laga sameeyo suuqa hoose e Seattle's downtown waterfront iyo in laga saraa dhismaha dhulgariirka u dabacsan meeleheena shaqada jidku ka socoto.
- Intii aan dhaxag dhignay mashruucii uu horeeyay ee.mashruuca la xidhiidha isbtaarada ee 2007, waxaa si guul leh u dhamaynay 30 kii baa 24 mashruuc kuwaas oo laga maamulay ama laga maalgaliyay dawlada.
- Dhismaha mashruuca ugu balaaran – wadada tunelka SR 99 – wuxuu bilawday 2011. Jidka isku dul saaran ee biriishk dhukeedka dhexdiisa waa la dhamaystiray waxaana loo furayaa gaadiidka si dhakhso ah oo ilaa dayrta 2018 ah.
- Marka uu biriishku diyaar noqdo, SR 99 waxaa la xidhi doonaa celcelis ahaan sadex todobaad si ay shaqaaluhu dayac tir ugu sameeyaan jidka biriishka dhuleedka taga.
- Kadib marka biriishka heleed la furo, kooxdu waxay qaadi doonaan isbaarada, waxay ka joojin doonaan jidka Biriish Hoosaadka Battery Street, waxayna jidk dib ugu xidhi doonaa dhamaadka waqooyi ee biriishka.dhuleedka.

Bishan May 2018 ee soo socota waxaa laga arki doona biriish dhuleedka qaybtiisa sare muqaalka mishiinka hawada qaada iyo nidaamkii laydhadhka. Waxaa la dhalaaliyay dhulkii madaw si uu dadka usoo jiito.

U.S. Department of Transportation Federal Highway Administration
Washington State Department of Transportation
King County
Port of Seattle
City of Seattle

Dhamaystirka biriishka suuqa hoose ee Seattle

Maarso 2018 qandaraaslaha, Seattle Tunnel Partners (STP), waxa uu dhameeyay dhismihii jidka is dul saarnaa ee biriishka dhuleedka dhexdiisa. Jid 2-mayl ah ayaa iminka hoos mara suuqa hoose ee Seattle, kaas oo isku xidha isteedyowmka iyo Seattle Center. Laakiin weli shaqo badan ayaa dhiman kahor inta aan biriishka loo furin gaadiidka.

Biriishka dhuleedka SR 99 waxa uu kamid noqon doonaa biriishyada adduunka ugu cajiibsan. Isku dhafka farsamadiisa, hawo mareenkiisa, dab damiska iyo nidaamyada kale ayaa wada shaqayn doona si gaadiidku si badbaado ah ugu socdaan oo biriish dhuleedkuna si wanaagsan ugu shaqeyso. Xagaagan, shaqaaluhu waxay ku rakibayaan, tijaabinayaan oo ay bilaabayaan nidaamyadan, si loo xaqiijiyo inay si wanaagsan u shaqaynayaan iyaga oo gaar gaar ah iyo iyaga oo wada jir ahba. Biriishka waxaa dib loo furayaasida ugu dhakhsaha badan ilaa dayrtan.

Shaqaaluhu waxay dhigayaan qayb ugu danbeysa ee jidka biriishka dhuleedka waqooyiga (qaybta hoose) Maarso 2018.

Nidaamka biriishku waxa uu dhax mari doonaa dhismayaasha shaqada ee labada dhinacba. Qaybta isku siman ee muuqata waa meesha mustaqbalka laga dhigi doono isgoyska jidadka Alaskan Way iyo South Dearborn Street.

Mashaariic waawayn oo aaga biyo dhaca Seattle ah

Waa dhawaan soo socda: in isbaarooyinka la qaado oo jidka sare la dhiso

Inyar kadib marka biriishka dhuleedka cusub loo furo gaadiidka, qandaraasle cusub ayaa bilaabi doona in isbaarooyinka qaado, oo uu buux buuxiyo qaybta sare iyo xidho Biriish Hoosaadka Battery Street, oo waxa uu dhisi doonaa sadex sakadood oo jidka Aurora Avenue North oo u dhaw Seattle Center.

Qaadista isbaarooyinka waxaa la filayaa inay qaadato ilaa sagaal bilood. Qardaraaslaha ayaa isbaarooyinka u qaado doonaa qaybo si uu u yareeyo in biyo dhacu khalkhaliyaan guryaha, ganacsiyada iyo dadka safraya. Inta ay Qandaraaslaha samaynayaan nashqada, waa inay racaan shuruudaha qandaraaska, sida in joogto loogu helo fursad Colman Dock, iyada oo la xadido xiritaanada wadada, yareynta duska iyo gariirka, iyo inla illaalinayo dhismooyinka iyo korontooyinka.

Dhamaadka dhanka waqooyi ee biriishk dhuleedka, Aurora Avenue North inta u dhaxaysa Harrison Street iyo Denny Way la haromiran doonaa dib ayaana loo dhisi doonaa. Jidka bari-galbeed ee ay maanta xidheen shaqada jidka laga galo Biriish Hoosaadka Battery Street—Harrison, Thomas iyo John—dib ayaa loo xidhiidhin doonaa, taas oo kor u qaadi doonta isa socodka jidhka bari-galbeed ee xaafada. Sidoo kale meelaha googo'an ayuu qandaraasluhu buuxin oo uu moorgarayn doona ee Biriish Hoosaadka Battery Street, kuwaas oo, sida isbaarooyinka, u dabacsan dhulgariir ah na kuwo wakhtigooduna dhacay.



Biriish Hoosaadka Battery Street waa la xidhi doonaa waana la moorgarayn, waxaana la furi doonaa Western Avenue na isbaarada ayaa kaga qaadi doonaa.

Jidadka Harrison, Thomas iyo John waxaa dib loogu xidhi doonaa Aurora Avenue North.

La soco!

Iimeel noogu soo dir viaduct@wsdot.wa.gov oo naga dalbo in aanu kuu soo dirno wararka ugu danbeeyay ee mashruuca qaadida isbaarooyinka, ama booqo www.alaskanwayviaduct.org.

Qorshaha soo socda: sadex-todobaad oo loo xidhi doono SR 99 si loo dayactiro

Marka biriisha dhulka hoos mara la dhameeyo, WSDOT ayaa la xidhi doona SR 99 celcelis ahaan sadex todobaad. Xidhitaankani waxaa uu usuurto gelinayaa shaqaalaha inay dhisaan qaybaha jaranjarada u danbaysay ee biriish dhuleedka iyo wado xidhiidhisa, iyo in loo dayactiro SR 99 biriish dhuleedka cusub. WSDOT waxay bixin doontaa wargalin ilaa hal bil kahor inta aan la xidhin. Wakhtiga rasmiga ah ee la furayaa waxay ku xidhan tahay hormarka ay sameyaan hawlgaleenadu si loo dhameeyo biriishk dhuleedka cusub.

Inta la xidhayaa waxay u dhaxaysaa South Spokane Street ee dhamaadka koonfureed ee Biriish Hoosaadka Battery Street. Qaybta koonfureed ee SR 99 wada yar ee ka baxda ee tagta Atlantic Street waxa la xidhi doonaa todobaad kahor inta aan si buuxda loo wada xidhin, qaybta cusub ee waqooyiga SR 99 wada yar ee tagta suuqa iyo Alaskan Way South waxay furnaan doontaa isbuuc ilaa laba isbuuc inta aan si fiican loo xidhin.

WSDOT way ogtahay xidhmada dariiq wayn oo halbawla ahi inuu cidhiidhi keenayo, waxayna kala shaqaynaysaa hay'adaha ay gacansaarka leeyihiin sidii loo samayn lahaa qorshe dadka loogu daaba guri lahaa inta uu xidhan yahay.

Macluumaadka muhiim ah oo loo baahan yahay in la ogaado:

- SR 99 waxa uu xidhnaanayaa celcelis ahaan sadex todobaad, inta u dhaxaysa Spokane Street iyo Biriish Hoosaadka Battery Street.
- Taariikhda ay ka bilaabmayso lama garanayo laakiin WSDOT waxay bixin doontaa wargalin ilaa hal bil ah.
- Dariiqa yar ee koonfurka kasoo baxaa ee taga South Atlantic Street waxaa la xidhaya hal isbuuc ka hore intaan ka xidhin SR 99.
- Dariiqa yar ee kasoo baxaa waqooyi ee taga South Dearborn Street waxaa la furayaa hal isbuuc ama laba isbuuc ka hor biriish dhuleedka SR 99 furutaankasii ka hor.

Jidka iyo meesha uu ku kala leexsamo xidhidooda waxay noqon doontaa (celcelis ahaan) mudo sadex todobaad ah kahor inta aan biriishka dhuleedka la furin.

Ha moogan oo la soco:

Riix: www.alaskanwayviaduct.org; www.99Tunnel.com

Tweet: @BerthaDigsSR99; #Realign99

Iimeel: viaduct@wsdot.wa.gov

Lahadal: 1-888-AWV-LINE

Boosta:
Alaskan Way Viaduct Replacement Program
Washington State Department of Transportation
999 Third Ave, Suite 2200
Seattle, WA 98104

Dadka Maraykanka Laxaadka La' Act iyo Ciwaanka VI warbixin

Xeerka Ameerikaanka Curyaanka ah (ADA) Warbixinta: Qoraalkaan waxaa lagu heli karaa qaab kale iyada oo i-meel loo soo dirayo WSDOT Kala duwanaanshaha/Kooxda arimaha ADA ee wsdotada@wsdot.wa.gov ama iyada oo la wacayo taleefonka bilaashka ah, 855-362-4ADA (4232). Dadka dhagoolka ah ama ay ku adagtahay maqalka waxay codsi ku sameyn karaan adiga oo ka soo wacayo Washington State Relay 711.

Ciwaanka VI: Waa Waaxda Gobolka Washington ee Gaadiidka (WSDOT) xeerka lagu hubinayo inuusan jirin qof lagu takooro, jinsiyada, midibka, asalka dhalashada ama jinsiyada, sida lagu sheegay Ciwaanka VI ee Xeerka Xaquuqda Madaniga ee 1964, kaas oo laga reebayo ka qeybqaadashada gudaha, loo diiday faa'idooyinka, ama haddii kale lagu takooro sida waafaqsa kuwa ka mid ah barnaamijyada iyo howlaha faderaal ahaan loo maalgeliyay. Qof walba oo aaminsan in in lagu xad gudbay VI ee illaalada, waxay uu cabasho u gidbin karaa Xafiiska Fursada Simman WSDOT (OEO). Wixii warbixin dheeraad ah ee la xiriiro Ciwaanka VI nidaamyada cabashada iyo/ama warbixinta la xiriirto waajibaadyadaada aan takoorka aheyn, fadlan la xiriir OEO Ciwaanka VI Xiriirka (360) 705-7082.

U.S. Department of Transportation Federal Highway Administration | Washington State Department of Transportation | King County | Port of Seattle | City of Seattle